


Sheekadii ku saabsanayd kirismaska ee Funkis



Shaqaalaha Funkis ayaa soo bandhigay waxyaalo lagu qurxiyo kirismaska. Daaqadda waxa ka lusha garangar caleen ah, qolka ciyaartana dhowr saacadood oo waraaqo ah iyo saqafka oo ay ka lushaan shalmado xarfo iyo baraf dhaldhalaalaya ah. Waxaa la yiraa qurxinta kirismaska. Waxa kaloo hadda qolka lagu qaxweeyo yaal buskudFilfil iyo rooti Lusskatt meeshii ay ka oolli lahaayeen wixii caadiga ahaa.

Dad badan ayaa la soo baxa waxyaalo ciidda masiixiga afarta asbuuc oo ka horeeya sida shumacyo iyo waxyaalaha funkis ka lusha oo kale. Waxay kaloo soo qaataan grann-ka laamaha yaryar, Tallka kuwiisa iyo cawsgaab ay wax ku qurxiyaan. Goorta ay mugdi noqoto waxa ifaya shumacyo iyo nalal qurxoon. Sidaa waxay u samaynaayan waa "dhaqan", caado u ah xilligan oo kale sanad walba.

Ma jecli marka dadku wax raraan oo wax kale keenaan. Waxaan jeclahay in wuxu ahaadaan sidoodii caadiga ahayd. Waxay ila tahay in ay wax si kale ah urayaan sida Geedka Grannka laamihiisa iyo buskudFilfil. Ilama aha in udugyadaas kala duwani isku habboon yihiin. Waan yara welwelaa marka meel walba sideedii caadiga ahayd laga beddelo.

Marka la gaaro xilliga qurxinta kirismaska ayaan codsan in aan ka qayb qaato si aan u arko meelaha alaabtaas la dhigo iyo si aan ugu diyaargarobo goorta kale oo aan iman doono. Waxaan kaloo shaqaalaha weydiisanayaa in ay ii geliyaan khaanad dhowr xabbo oo buskudka kex oo caadiga ah bal in aan cuni karo. Haddaan ogaado in aan cuni karo buskudka kex ee caadiga ah waan xammili karayaa urta ka soo baxda buskudFilfilka.

Haddii ay dhib noqoto waxaan ku fikiri in kirismaska uun ay tan dhacdo. Ka dib ay wax walba sidii hore ku noqonayaan una shaqaynayaan!



Sheekadii ku beddelidda koofiyad dhaxan mid food leh xilliga guga

Waddankayaga waxaa ka jira xilliyo kala duwan: oo macneheedu yahay in ay jiraan cimmilooyin kala duwan oo ku xiran hadba xilliga lagu jiro. Xagaaga waa kul, dayrta ayaa ka yara qabow waxa badanaa jira dabayl iyo roob. Jiilaalku waa qaboobe oo waxa dhaca baraf iyo qabow badan. Gu' gu waa kul iyo qabow yar. .

Qofku wuxuu u baahan yahay dhar xilli oo kala duwan si uu diirimaad ku filan u helo. Hadda waa gu' waana goorta koofiyadii dhaxanta lagu beddelo koofi food leh si aanan u kululaan marka dibadda joogo. Koofiyadani qoraxda ayey ka ilaalisaa indhaha iyo wajiga.

Ma jecli qaadashada koofi food leh, sidii caadiga ahayd ma dareemayo. Si aanan jeclayn ayey iiga xoqxoqdaa dhegaha halka hore ee wajigana waa iga xadataysaa. Waxan rabaa koofiyaddii qabowga ee debecsanayd oo aan meelna iga xoqaynin iyana xadataynayn.

Dhowaan markay gu' noqoto waxa fiican in la bilaabo raadinta koofi food leh oo aad u jilicsan inta aan la gaarin isticmaalka dibadda. Haddiise ay noqon weydo mid aad u fiican waxa laga yaabaa in lagu dhaqi karo qasaalad si ay u yara jilicdo. Ama waxa kabay jilicsan lagu dhejin karaa cirifka xanafta leh oo wajiga xadataynaya. Waalidkay ayaa taa iga caawin kara. Waxaa kaloo fiican in koofiyadda guriga gudahiisa lagu isticmaalo wakhti yar maalin kasta inta aan guga la gaarin. Markaas diyaar baan u ahay sida aan dareemi doono marka dibadda ula bixi.

Haddii aan weli dareemo inaaney suurtoobayn inaan koofiyadda isticmaalo waxa jira koofiyado qoraxeed ka jilicsan ta foodda leh; waxa ugu muhiimsan waa in ay shaqayso iyo anaan kul kaafi ah hela qoraxdana ay iga ilaaliso!

